



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maarso 15, 2021

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoyska ee NCI

Horraantii sanadkani waxaanu bixinay macluumaad ku saabsan [Ra'yi ururinta Barnaamijka Adult in-Person](#) iyo [Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha](#).

Ra'yi ururinta Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI) oo kale oo muhiim ah ayaa Oregon ka dhici doonta sanadkani. Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoyska ee NCI waxaa loogu talagalay carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) wuxuuna bilaabmi doonaa bishan. Waanu ognahay in sanadkii la soo dhaafay uu ahaa mid adag waxaanan qof kasta uga mahad celinayaan fiirada gaarka ah ee ay siiyeen ra'yi ururintani. Ra'yi ururinta sanadkani waxaa ku jiri doonaa su'aalo la xiriira COVID-19 si aanu ugu dadaali karno in aan si wanaagsan u fahamno saameynta uu cudurka baahsan u yeeshay carruurta iyo qoysaskooda.

NCI waa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha. Afartan iyo lix gobol iyo District of Columbia ayaa ka qayb qaata mashruuca, oo na siinaya xog isbarbardhig oo wanaagsan.

Muujiyayaasha xudunta u ah Mashruuca NCI wuxuu fiiriyaa natiijooyinka loogu talagalay dadka iyo qoysaska helaya adeegyada. Muujiyayaashu waxay muhiimada siiyaan, shaqada, xuquuqaha, qorsheynta adeega, ka mid noqoshada bulshada, kala doorashada iyo caafimaadka iyo badbaadada.

Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoysku waa ra'yi ururin dhanka warqada ah oo boosta loogu soo diri doono dhammaan qoysaska haysta ilme qaba I/DD oo ku nool guriga qoyska oo hela ugu yaraan hal adeeg oo aan ka ahayn maamulka kiiska. Ra'yi ururintu waxay qaadataa 20 daqiiqadood si loo dhamaystiro.

Ra'yi ururintani waxaa boosta lagu soo diri doonaa Maarso 2021. Qoysasku waxay yeelan doonaan fursad ay ra'yi ururinta kaga buuxiyaan dhanka internet-ka, taasi oo si toos ah u aada NCI, ama waxay ra'yi ururintooda oo dhammeystiran boosta ugu soo diri karaan Guddiga Naafanimada Korriinka ee Oregon oo jawaabaha soo galin doona nidaamka internet-ka. Ra'yi ururintu waa mid gabi ahaan qarsoodi ah sidaa darteed qofna ogaan maayo sida qoysaska uga jawaabaan su'aalaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NCI, fadlan booqo website-keeda <http://www.nationalcoreindicators.org/>.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan nidaamka ra'yi ururinta ee ka jira Oregon, fadlan Julie Hoyt kala xiriiir [Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us](mailto:Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us) ama telefoon ahaan 503-891-7405.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Fariintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.